45

JAMHUURIYADDA DIMUQORAADIGA SOOMAALIDA

WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA

XAFIISKA MANAAHIJTA

# TAARIIKH

## FASALKA SADDEXAAD



# TAARIIKH

## FASALKA SEDDEXAAD

# 3

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA**
**XAFIISKA MANAAHIJTA**

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin ogolaansho

Waxaa lagu daabacay
**Madbacadda Qaranka**
XAMAR, 1975

## BUUGGA TAARIIKHDA- FASALKA SADDEXAAD

Buuggani waxa uu ka kooban yahay afar iyo labaatan cashar. Sagaalka cashar ee hore waxay ka hadlayaan Ilbaxnimadii hore ee addunka ka abuurmay dhalashadii Ciise horteed. Dadka Ilbaxnimadaa sameeyay waxa loo qaybiyay laba qaybood. Qaybta hore waa Masar, Mesobotaamiya, Beershiya iyo Gasiiradda Carabta oo ay waddanka Soomaaliya xiriiro ka dhexeeyeen. Qaybta labaad waa Giriiga, Rooma, Hindiya iyo Shiinaha. Labada qayboodba, waxa la isku deyay in ardayga la tuso waxyaalihii Ilbaxnimadaa hore addunka u kordhisay caam ahaan, iyo wixii laga bartay.

Buugga qabtiisa labaad waxay ku saabsan tahay diinta islaamka iyo sidii ay addunka ugu fidday. Qaybtaasi waxay ka kooban tahay shan iyo toban cashar.

Labada qaybood marka la isku qaado, waxa ardaydu ka helaysa macluumaad ama aqoon badan oo faa'iido u leh. Hase yeeshee waxa la arkaa in casharadaasi macallinka ku khasbaan in uu wixii u heli karo ee casharadaa ku saabsan u akhristo oo wixii uu soo korodhsado ardayda u gudbiyo. Macallinku waxa kale uu u baahan yahay in uu ku dedaalo si uu u helo khariidado, sawiro iyo kaalmeeyayaal kale uu ardayda ku tuso waxa casharadu ka hadlayaan.

Casharadda qaarkood way dhaadheer yihiin oo deris qura way ka badan karaan. Waxa macallinku awood u leeyahay in uu casharadda caynkaas ah uu u qaybasado laba deris si loo gaaro ujeeddada laga leeyahay.

Laylisyada casharadda ka dambeeyaa way yaryar yihiin, markaa macallinku wuu kordhisan karaa taariikhaha qoriinkooda iyo micnohoodaba waxa la rabaa in macallinku ardayda ka dhaadhiciyo. Tusaala ahaan marka la qoro (150) C. H. ama (20) C. D. waxa loo jeedaa 150 sano dhalashadii Ciise ka hor ama 20 sano dhalashadii Nebi Ciise ka dib. Taariikhda (C/D) sare ayay u socotaa, ta ah (C.H.) na hoos ayay u socotaa. Sanadka ku xigga 150 C.H. waa 149 C.H., ka ku xigga 20 C.D. waa 21 C.D. Taa waa in ardayda la fahamsiiyaa oo laylis badan lagu siiyaa.

Xafiiska Manaahijtu waxa uu u mahad naqayaa Jaalle Daahir Cali Maxamed iyo Jaalle Maxamed Faarax Cismaan oo buugga qoray.

Xafiisku waxa kale oo uu u mahad celinayaa Jaalle Cawil Maxamed Yaasiin oo Sawiradda iyo kharidadaha sameeyay.

Waxaa kale oo u mahad celinayaa kooxdii buugga garacday.

Bashiir Faarax Kaahiye
Maamulaha, Xafiiska Manaahijta
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta — Xamar

## CASHARKA KOWAAD


# S O O M A A L I Y A

Markii aad eegtid khariidaddaa aduunka waxaad arki kartaa in dhulka Soomaalidu ku yaal qorrax ka soo baxa geeska Afrika, galbeedna ay ka xigto Itoobiya, Waqooyina Gacanka Cadmeed, Barina bad-weeynta Hindiya koonfurna dalka Kiiniya. Sida taariikhdu dhigtay, dhulka Soomaalidu ma aha mid dhowaan dhashay ee waxa weeye waddan ka mid ahaa ilbaxnimadii adduunka hore uga dhalatay oo ay ka mid ahaayeen ilbaxnimadii hore ee Masar, Mesobotaamiya, Beershiya, Carabta, Hindiya iyo tii Shiinahaba. Taas waxa tusaale u noqon kara, xiriirka kala duwanaa oo waddankeennu uu la lahaa dawladahaas kor ku sheegan. Xiriirka ka dhexeeyey Soomaaliya iyo Ilbaxnimadaas hore waxa uu u qaybsanaa xiriir ganacsiya, dhaqan iyo mid bulshada, khaas ahaan waddannada Carabta, Beershiya, Mesobotaamiya iyo Masarba.

Haddii aad dib ugu noqotaan sababaha ugu wacan in Soomaalidu xiriiro kala jaad ah la yeeshaan Ilbaxnimadaa hore, ugu horeeyn dhulka Soomaalida oo ku yaalley bartamaha caalamkii markaa u qaybsanaa Ilbaxnimadii bari sida tii Hindiya iyo Shiinaha, iyo Ilbaxnimadii Bari Dhexe oo ay ka mid ahaayeen Masar, Carabta iyo kuwii kale oo aynu kor kaga hadallayba. Mar labaadka waddanka Soomaalidu waxa uu ku caan ahaa dhulkii Beeyada.

Beeyadu waxay ahayd geed ay dadkii hore oo dhammi aad u dooni jireen. Beeyadu sideedaba waa geed Waqtiyadii hore iyo kuwakanba meelaha wax lagu caabudo oo dhan loo shido Tan saddexaad caalamku waqti kasta uu joogey weligiiba waa isu baahnaa si midba midka kale waxa uu doonayo uga helo. Taasina waxay dhalisay in ummadahaas hore ay yeeshaan xiriiro wax kale iibsi. Si aynu u ogaanno xiriirka ka dhexeeyey in-

naga iyo waddamadaas, waxaynu soo qaadeynaa dawladahaas hoos ku qoran:




1. Ilbaxnimadii hore ee Masaarida.
2. Ilbaxnimadii hore ee Mesobotaamiya.



3. Ilbaxnimadii hore ee Beershiya.
4. Ilbaxnimadii hore ee Carabta.

**LAYLIS:**

1. Sheeg meesha ay Soomaaliya Khariidadda adduunka kaga taal?
2. Muxuu ahaa xiriirkii ka dhexeeyey waddankeenna iyo Ilbaxnimadii hore?
3. Dhawr sababood ayaa waddankeenna u suurto geliyey inuu xirir la yeesho adduunkii hore. Wax ka sheeg sababahaas?

CASHARKA LABAAD

## ILBAXNIMADII HORE EE MASAR

Ilbaxnimadii hore ee Masaaridu waxay ka dhalatay dhinaca waqooyi bari ee qaaradda Afrika muddo lagu qiyaasay 5800 oo sano ka hor dhalashadii Ciise.

Caalamku waxa uu isku raacay in Masaaridu ahaayeen ummaaddii ugu horreeysey ee Ilbaxnimo weyn adduunka ka samaysatay. Ka dibna waxay caalamka uga tagatay dhaxal qiimo badan leh oo ilaa iminka dadka adduunka ku nooli u daawasha tago. Haddii aynu sii raacno waxyaalihii u sabab ahaa dhalashada Ilbaxnimadaas, waxa weeye dhawr. Tan hore Ilbaxnimada Masar waxay ka abuurantay hareeraha webiga weyn ee Niil. Tan labaad waxa webigaasi keeni jirey ciid fiican oo Masaarida u suurtogelyey in ay beertaan dhul badan oo ka mid ah qorarka Niil. Tan saddexaad waddanka Masaaridu waxa uu ku yaal laba lama degaan dhexdood, sidaas darteed ayaa cadow ku soo duulaa aanu u badnayn ilaa waqtiyaal dambe mooyee. Ugu dambaystii boqor kasta oo xukunka Masar qabtay waxa uu ku dadaali jiray in uu wax xusuus reebi kara ka tago.

## SIDA AY BOQORTOOYADA MASAR KU BILAABANTAY

Sida taariikhdii hore sheegeyso dhulka Masaaridu waxa uu u qaybsanaa laba gobol mid la oran jirey Masarta Sare iyo tan kale oo ahayd Masarta hoose. Labada gobol mid waliba waxa uu lahaa boqortooyo gaar ah. Markay taariikhdu ahayd 3500 C. H. ayaa boqorkii la oran jirey Miines uu isu keenay labadii boqortooyo. Miines waxa uu u sameeyey dawladii cusbayd magaalo madax la oran jirey Memfiis, waxayna ku taalley Masarta hoose. Halkaas ayey boqorradii isaga dembeeyey waddankana ka xukumi jireen. Xukunka Masar waxa isaga dembeeyey boqortooyin badan.

Waxaa inakaga filan in aynu ogaanno in boqor kasta oo talada waddanka qabtaa uu ku dadaali jiray in uu dhismihii raggii isaga ka horreeyey bilaabeen halkiisa ka wado.



## WAXYAALAHII MASAARIDII HORE KA TAGEEN

Sidii aynu horeba u soo aragnay Ilbaxnimadii Masaaridu kuma ay dhisnayn wax muuqda uga taga caalamka idinka dambeeya keliya ee waxay ahayd mid ku dhisnayd fikrado aad u qota dheer isla markaana ku fadhiya cilmi heerkiisu sarreeyo. Taasi waa mid adduunku ka faa'iideystey.

## DHINACA CILMIGA SAYNISKA

Waxa addunku isku raacay in Masaaridii hore aqoon dheer u lahaayeen cilmiga juqraafiga, cilmi falagga ama xiddigiska iyo xisaabta oo iyadu asaasba u ahayd. Waxa kale oo ay aad ugu xeel dheeraayeen cilmiga kiimiyaha. In ay aqoon gaar ah lahaayeen waxa u daliil ah weli in aan la helin dawadii ay jirka boqorradooda ku dhawri jireen.

## XAGGA DHISMAHA

Muran kuma jiro in caalamku xagga dhismaha uu kaga dayday Masaaridii waxaana tusaale inoo ku filan sida la yaabka leh ee ay taallooyinkoodii u dhisan yihiin. Waxyaalaha Masaarida lagu xusuusto waxa ka mid ah iyaga ahaa ummaddii ugu horreeysey ee afkeeda qortay.

Taasi waxay u suurto gelisey in ay wax allaale wixii fikrado ay lahaayeen qoraan, adduunkuna uu maanta akhrisan karo. Farta Masaaridu waxay ku bilaabantay sawirro, laakiin muddo dabadeed ayey isu bedeshay xarfo loo yaqaan Hiroqliifiya. Ugu dambays Masaaridu iyaga ayaa ugu horeeyay cid sameysa Kalandaariyada taariikhda.

### Xiriirkii Masaaridii hore iyo Soomaalida

Xiriirka ka dhexeeyey Masaaridii hore iyo Soomaalida waxa uu ahaa mid qota dheer lahaa. Xiriirkaasi waxa uu ka koobnaa ganacsi iyo dhaqanba. Xagga ganacsiga oo ahaa midka u muhiimsanaa waxa uu heer sare gaaray markii boqoraddii la oran jirey XITSHEBSUUT oo muddo 22 sano ah Masar xukumaysay doonyo u soo dirtay Soomaaliya, iyaga oo sidey alaabo fara badan oo ay ka mid ahaayeen: Jinjimo, dugaagado, alaabo la naqshadeeyey, iyo hadiyado loo soo diray dadka Soomaalida.

Isla markaa waxa doonyuhu dalkeenna ka qaadi jireen Beeyo, Malmal, Hargo, Harimacad, Baalgorayo, iyo dhir la doonayey in Masar lagu tallaalo. Sheekada safarka doonyahaas waxa lagu qoray derbiga haatan loo yaqaan Deyr Al Baxri ee ku yaal magaalada Aswaan (Masar).

## XAGGA DHAQANKA

Shaki ma laha in labada waddan ay isu dhaqan dhowaayeen waxaana laga garan karaa alaabta lagu dhaqmo oo isku mid ahayd, iyo erayo badan oo isu dhawaa.

Waxa kale oo jirey inay iskaga mid ahaayeen xagga dhar qaadashada

---

**L A Y L I S :**

1) Ilbaxnimadii hore ee Masar waxa dhaliyey dhawr sababood, wax ka sheeg sababahaas?

2) Ka sheekee sidii boqortooyadii Masar ku samaysantay?

3) Maxaa ka mid ahaa waxyaalihii Masaaridii hore ay adduunka uga tageen?

4) Ka faallood xiriirkii ka dhexayn jirey Masar iyo Soomaaliya?

5) Waa sidee xiriirka Masar iyo Soomaaliya hadda?





## ILBAXNIMADII HORE EE MESOBOTAAMIYA

Ilbaxnimadii Mesobotaamiya oo dhulka haatan dawladda Ciraaq deggan tahay ka abuurantay waxay ku magac dheerayd Ilbaxnimadii ka dhalatay labada webi dhexdooda, labadaas webi oo kala ah Dajla iyo Furaat. Mesobotaamiya ma lahayn sida Masar xuduud dabiici ah oo ka celiya cadow weerar ku soo qaada. Sidaas darteed dhulka Mesobotaamiya waxa qabsaday dawlada badan oo mid waliba muddo xukumeysey. Dawladdii u horreysey ee waddankaa qabsatay waxa la oran jirey (Sumeer), dadkeeduna waxa uu ka yimid dhulka Carabta. Boqorkii sumeeriyiinta oo ku magac dheeraa Sarjoonkii kowaad ayaa duullimaad ku qaaday dawladihii badnaa oo mid kasta laga xukumi jirey magaalo madax u gooniya, ka dibna halkaas waxa uu ka dhisay boqortooyo qura. Hase yeeshee markay taariikhdu ahayd 2,100 C.H. ayaa nimankii la oran jirey Reer Baabil madaxna uu u ahaa boqorkii Xamuraabi xukunkii dalka la wareegeen, dabadeedna iyagaa halkaas ka sameeyey Ilbaxnimada runta ah ee Mesobotaamiya. Ugu dambaystii, waxa mesobotaamiya qabsaday dad ku noolaa woqooyiga Baabiloon oo la oran jirey (Assiiriyiin) ahaana dagalyahanno. Dadkaa dambe iyaga ayaa bilaabay dal balaarsi waxayna qabsadeen waddanno fara badan oo ay ka mid ahaayeen, Beershiya, Suuriya iyo Falastiin.

## WAXYAALIHII MESOBOTAAMIYA LAHAYD

Haddii aynu eegno xagga dhismaha waxa muuqata inay ka duwanaayeen Masaaridii hore, sababta oo ah Mesobotaamiya ma lahayn dhagax wax lagu dhiso, waxay wax ku dhisan jireen leben. Lebenkaas waxay ka dhisan jireen guryo, gidaarrada beeraha iyo meelaha wax lagu caabudo. Waxyaalihii ay dhiseen waxa ka mid ahaa Beerihii Lushay oo toddobada wax ee adduunka ugu yaabka badan ka mid ahaa. Waxaa kale oo lagu yiqiin giraangiraha gaari faraska. Qoraalka farta Mesobotaamiyintu sida Masaarida ayey lahaayeen far la oran jirey Kunifoom, waxayna ku qori jireen dhoobo la qalajiyey; Waxa kale oo ay nimankaasi adduunka uga tageen xeerar uu dejiyey boqorkii caamka ahaa ee Xamuraabi. Xeerarkaasina waxay ahaa-

yeen kuwo dadka farayye caddaalad. Waxaa ka mid ahaa xeerkaa, ninkii, nin il ka rida waa in isagana isha laga rido.

## XIRIIRKA KA DHEXAYN JIREY MOSOBOTAAMIYA IYO SOOMAALIYA

Labada waddan waxa ka dhexeeyey xiriir qoto dheer lahaa ha ahaado mid ganacsi iyo mid dhaqanba. Dhinaca ganacsiga oo ahaa kan ugu muhiimsanaa, waxa ay Mesobotaamiya Soomaaliya keeni jirtey timir iyo alaab ka samaysanayd Naxaas) waxayna Soomaaliya ka qaadan jirtey waxyaalo ay ka mid ahaayeen Beeyo, Qoryo, iyo Baalgorayo. Waxa halkaa isaga dhoofi jirey doonyo iman jirey Awdal (Saylac), Berbera iyo Bosaaso. Xagga dhaqanka, waxa jirey waxyaalo labada waddan ay iskaga dhowaayeen, sida caadaadka iyo erayo xagga afka ka dhexeeyay.

**L A Y L I S :**

1. Waxaad soo qaadaa khariidadda adduunka oo waxaad ku muujisaa meesha ay Ciraaq ku taal?
2. Sheeg dawladdii u horreeysey oo waddanka Mesobotaamiya qabsata iyo meesha dadkaasi ka yimaadeen?
3. Maxaa ka mid ahaa waxyaalihii reer Mesobotaamiya caalamka uga tageen?
4. Wax ka sheeg xiriirka ka dhexayn jirey Soomaaliya iyo Mesobotaamiya, mid dhaqan ahi haddii uu jireyna sheeg?
5. Maxaa la yiraahdaa magaalo madaxda dalka Ciraaq?



CASHARKA AFRAAD

## ILBAXNIMADII HORE EE BEERSHIYA

Waddanka haatan loo yaqaan Boqortooyada Iiraan kana tirsan dawladaha ku yaal Bariga dhexe waxa uu ka mid ahaa ummadihii dhulkooda ka sameeyay Ilbaxnimo weyn, oo la magac baxday Ilbaxnimadii hore ee Beershiya. Sida taariikhdu dhigayso, dadka reer Beershiya waxay markoodii hore deganaayeen bartamaha qaaradda Aasiya.

Hase yeeshee markay taariikhdu ahayd 836 C.H. ayey ka soo guureen meeshii ay hore u deganaayeen, waxayna soo degeen dhulka ay Ilbaxnimada ka abaareen ka dibna dadku u yiqiin Beershiya. Xagga jinsiga waxa Beershiyiintu isugu jireen laba qolo oo la kala oran jirey Hindi, Urobbi, dadkaas intooda badani waxay aadeen qaaradda Yurub.

Markii u horreeysey ee Ilbaxnimada Beershiya bilaabantay waxa Beershiyiinta dusha ka xukumi jirey Boqortooyo la oran jirey Boqortooyadii Miidiya.. . . Markay taariikhdu ahayd 558 C.H. ayaa labadii qolo waxa dhex maray isafgaranwaa ka dhashay gumeysigii Miidiyiinta, waxayna arrintii ka dhamaatay in nin la oran jirey Sayras uu dagaal ku qaaday Miidiyiintii waxana uu halkaas ku burburiyey Boqortooyadii Miidiya. Isla markaana wuxuu Sayras gacanta ku dhigay xukunkii labada dal oo ah Beershiya iyo gobolkii Miidiyiintu deganaayeen. Sayras waxa xukunka uga dambeeyey inankiisii oo la oran jirey Kambiises. Ninkaas dambe waxa uu bilaabay duullaan waxuuna qabsaday Masar oo dhinaca dhaqaalaha waqtigaa ku fiicnayd. Boqorkii waddanka Beershiya ugu magac weynaa wuxuu ahaa Daariyuuskii (Kowaad), sababtoo ah isagoo baabiyey dhibaatooyinkii ka taagnaa dhulka Beershiya. Tan labaadna waxa uu dhisay Imbaraadooriyad weyn oo ka dhexaysa Badda Cad iyo dhulka Hindiya. Laakiin markuu dhintay ninkaasi, raggii ka dambeeyey ayaa xukunkii hanan waayey. Taasi waxay dhalisay in markay taariikhdu ahayd 331 C.H. ninkii la oran jirey Aliskandar oo ahaa Giriig uu qabsaday Beershiya iyo dalalkii ay xukumi jirteyba, Beershiyana waxay ka mid noqotay Imbiraadooriyadii uu ninkaasi dhisay.

## WAXYAALIHII BEERSHIYA LAHAYD

Waxa reer Beershiya loo aqoonsan yahay inay ahaayeen niman xagga dagaalka ku xeel dheer, sidaas darteed waxay lahaayeen hub kala duwan iyo fardo iyo maroodiyaal lagu qaado hubkaas. Taasina waxay u suurto gelisey inay dalal badan qabsadaan sida kor ku sheegan. Xagga Diinta waxay Beershiya lahayd diin la oran jirey Shiraadiski waxayna ahayd diin Islaamka aad ugu dhow markii laga eego dhinaca wax is faridda iyo wax iska reebbidaba. Dhinaca farta waxay Beershiyiintu ka mid ahaayeen dadkii afkooda qoray, waxayna fartoodu ka koobnayd 36 xaraf.


Waxay fartooda ku qori jireen xeerka, diinta iyo wixii kaloo ay u baahdaan inay qoraan. Xagga dhismaha waxa Beershiyiintu ku daydeen Mesobataamiya oo leben wax ku dhisan jirtey.

## XIRIIRKA SOOMAALIDII HORE IYO BEERSHIYA

Sida Soomaalidu xiriiro kala duwan ula lahaan jirtey Masaarida iyo Mesobotaamiya, ayey ula lahayd kuwo la mid ah dalka Beershiya. Xiriirkaa oo waqti hore bilaabmay waxa uu isugu jirey xiriir ganacsiya, dhaqan iyo mid bulshanimo ah. Xagga ganacsiga waxay labada waddan lahaayeen baayacmushtar. Haddi aynu eegno waxa Beershiya ay keeni jirtey waddanka Soomaalida wax ka mid ahaa timir, sabiib iyo alaabo laga sameeyey bir iyo broons.

Waxay waddankeenna ka qaadan jirtey alaabo ay ka mid ahaayeen hargo, beeyo, qoryo iyo baalgorayo. Dhinaca Bulshada ruux kasta oo Soomaali ah waxa uu ka warqabaa in dadbadan oo reer Beershiya ahi ay yimaadeen dhulka Soomaalida, waxna ay ka dhiseen magaalada Xamar. Dadka qaarkiisna waxay qabaan in magaca Shaangaani oo ah Xaafad Xamar ka mid ah uu asalkiisu ahaa Beershiya. Tan kale waxaynu ogsoon nahay in sannadka Soomaalidu uu ka bilaabmo Dabshidka (Neyruus) neyruushkuna inakaga yimid dalka Beershiya. sidoo kale cayaarta aynu u naqaan Saar waa mid iyana ka timi dhulkaas. Dadka Soomaaliyeed waxay erayadaas ka dhigteen kuwo iyagu iska leeyihiin. Xiriirka maanta ka dhexeeya labada waddan waa mid wanaagsan.






**LAYLIS:**

1. Xaggee bay dadka reer Beershiya ka yimaadeen intii aanay soo degin dhulka la magac baxay Beershiya?
2. Sheeg sidii ay ku dhalatay Boqortooyada Beershiya?
3. Maxaa la oran jirey ninkii burburiyey Boqortooyadii Beershiya?
4. Ka sheekee xiriirka ka dhexeeyey Soomaaliya iyo Beershiya, waxna ka sheeg inta xiriirkaasu u qaybsanaa?

CASHARKA SHANAAD

## ILBAXNIMADII HORE EE GASIIRADDA CARABTA

Inkasta oo Gasiiradda Carabtu aanay Ilbaxnimo wada lahayn haddana gobollo waddankaas ka mid ahaa ayaa Ilbaxnimo weyni ka dhalatay sida dhulka Yaman oo kale. Shaki ma laha in Carabtu ka mid ahayd Ummadihii Ilbaxnimadii hore qayb weyn ka qaatay. Waxa taas u suurto geliyey in Carabtu qayb wacan ka soo qaadatay dhismaha Ilbaxnimadaas, dhulkoodaa ku yaalley jidka isku xirayey bari iyo galbeed. Carabtu iyaga ayaa degganaa badaha laysu mari jirey, sida badda Carabta, Gacanka Cadmeed iyo badda Casba.

Tan kale Carabtu waxay lahaayeen doonyo u kala guri jirey alaabta u kala socota labada dhinac. Waxa kale oo Carabta lagu yiqiin inay dhulkooda ka dhoofi jireen si ay uga helaan wax ganacsi iyo baayacmushtar hadba meeshii ay tagaan, taasina waa mid dhalisay in Carabtu ku fiddo dhulal badan oo adduunka ah.

Yaman oo ugu taariikh dheer dawladihii ka dhashay Gasiiradda Carabta, waxay lahayd Ilbaxnimo aad adduunyada looga yaqiin oo kuba magac dheerayd Yaman Barwaaqo. Boqortooyadii u horreysey ee Yaman ka dhalatay waxay ahayd Macin, waxayna markaa taarikhdu ahayd 1,200 C.H. Macin waxay ku xeel dheerayd dhinaca ganacsiga iyo iyada oo gudbin jirtey alaabta bari iyo galbeed u kala socota.T aariikhdu markay ahayd 650 C.H. ayaa dawladdii Saba oo ahayd middii ugu xoog weyneyd xukunkii Yaman qabsatay. Boqortooyada Saba waxay dhistay Biya xireenkii la oran jirey Ma'rab oo weli dhismihiisii qaar ka mid ahi taagan yihiin. Laakiin Saba magaceedu wuxuu sare u kacay markii Boqoraddii la oran jirey Balqiis xukunka qabatay. Boqoraddaasi sheeka dheer ayey ku leedahay taariikhda, waxaynu ku soo gaabineynaa in xooggii yamani lahayd uu gaarey Suleymaan oo boqor u ahaa Falastiin.

Waxa dhex maray isaga iyo Balqiis isafgaranwaa halkaana waxa ka dhashay in Suleeymaan u soo diray digniin uu ku talinayo in Bulqiis is dhiibto. Arrintii waxay ku dhammatay in



Boqoraddii isu dhiibto Suleymaan. Ugu dambeeystii waxa xukunka Yaman u haray Boqortooyadii Ximyar iyadoo waddanka u talineysey ilaa islaamku ka dhashay.

## WAXYAALIHII CARABTU LAHAYD

Sida adduunku qirayo Carabtu waxay ahaayeen dad Ilbaxnimadii hore qayb weyn ku lahaa. Waxa kale oo Carabtu ku caan ahaayeen in ay galbeed geeyeen waxyaalihii Ilbaxnimadii bari oo dhammi lahaayeen. Carabtu aad bay ugu horreysey Cilmiga Sayniska. Tusaale ahaan, Cilmiga kimistari waxa lahaa Xasan Ibnu Haysani, jabradana waxa leh Jabri Cilmiga Bulshadana Ibnu Khalduun. Dhinaca Falsafada suugaanta iyo Muusiiqada aad bay ugu horreeyeen, iyagaana reer galbeedka u geeyey. Xagga Juqraafiga Carabtu iyagaa sameeyey jeheeyaha badahana isagey ku mari jireen. Dhinaca dhismaha Carabtu waxay sameyn jireen saro waaweyn iyo biyo xireenno sida Ma'rab.

Waxaan la halmaami karininay Carabtu ka mid ahaayeen cidii ugu horreeysay tarjimadda oo ay tarjimeen buugaggii Giriigga iyo Beershiya, halkaana dadku faa'iido bdan ka helay.

## XIRIIRKA KA DHEXEEYEY CARABTA IYO SOOMAALIDA

Soomaalida iyo Carabtu weligoodba waxay ahaayeen dad deris ah oo aan xagga juqraafiga ku kala fogeyn. Taasina waxay dhalisay in labada waddan uu dhex maro isbahaysi guud. Haddii aynu wax ka sheegno xiriir ganacsi dhaqan iyo mid Bulshaba. Kan ganacsiga Carabtu waxay Soomaaliya u keeni jireen dhar xariir ah, seefo, geed udug, sida cuudka iyo jaawida iyo xawaashka iyo filfisha. Waxay Soomaaliya ka qaadan jireen hargo, beeyo, qoryo iyo waxyaala kaleba.

**Xagga dhaqanka:** Sida runta ah innaga iyo Carabtu waxba kuma kala duwaneyn ha ahaato dhinaca caadaadka, xeerka iyo **bulshadaba.**

**Xagga Bulshada:** Nin kasta oo ka tirsan labada Ummadood wuxuu ogsoon yahay in dad badan oo Carab ihi ay ku beermeen dhulka Soomaalida dadkasina waxay degeen magaalooyinka xeebaha ku yaalla, waxaana ka mid ah Xamar, Marka,

Kismaayo Baraawe Boosaaso, Berbera iyo Seylac. Waxaynu ognahay in dad Carab u dhashay ay Muqdisho iyo Kismaayo inta u dhexaysa xukumi jireen. Xukunka waxaa bilaabay Barqash oo markii dambe u guurey Sinjibaar oo ka tirsan dalka Tansaaniya. Xagga dhaqanka: Labada dad aad bay isugu dhaqan dhow yihiin siiba Afka. Af Soomaaliga waxa ka buuxa erayo Carabi ah laakiin innaga inoo noqday Soomaali sida: Faras, albaab iyo kuwo kaloo aan la tirin karin.

**LAYLIS:**

1. Sheeg waxa Carabta u suurto geliyey inay isku xiraan bari iyo galbeed?
2. Tumay ahayd Boqortooyadii u weynayd ee waddanka Yaman ka dhalatay?
3. Afar arrin ka tilmaan waxyaalihii Carabtu dadka uga horreeyeen?
4. Ka sheekee xiriirkii Soomaalidu ay Carabta la layayd?



## ILBAXNIMADII HORE EE GIRIIGGA

Waddanka Giriigu waxa uu ahaa dhul gasiirada badan. Dhulkaasi wuxu ahaa kii qaaradda Yurub ugu horreeyey oo Ilbaxnimo weyni ka dhalto muddo aan ka yarayn 5,000 oo sano C.H. Giriiggu ma ahayn dad dhulkaa u dhashay, laakiinse waxay ahaayeen dad ka yimid dhinaca Aasiyada yar dabadeedna degey meeshaa Giriig la magac baxday. Markii horeba waxay dadkaasi ku fiddeen Badda Cad hareeraheeda, waxayna halkaa ka bilaabeen ganacsi iyo dalmarnimo iyo inay xiriir la yeeshaan dadkii hareeraha Baddaa deganaa oo ay ka mid ahaayeen Masaarida iyo Carab kaleba. Dhulka Giriiggu wuxuu ahaa waddan buuro kala qoqobeen, sidaa awgeed ayaa dadkaasi samaysteen dawlado yaryar oo mid kastaaba ay goonideeda isu xukunto. Hase ahaatee waxa ka dhexeeyey dawladahaas yaryar isbahaysi guud iyo magac guud oo la oran jirey Helen.

## WAQTIGII HORUMARKA GIRIIGGA

Markey taariikhdu ahayd 400, C.H. waxa waddanka Griigga ka bilawday waqti aad u qiima badnaa sababto ahayd dhinacyo badan oo horumar ahaa ayaa waddankaasi gaarey. Haddii aynu soo qaadanno xagga waxbarashada dad badan ayaa waxay heleen dugsiyo ay ka bartaan, sida wax loo qoro, loo akhriyo iyo sida wax loo tiriyaba. Waxa kale oo la sameeyey qofkii aan ka soo bixin waxbarashadaas inuu helo ciqaab iyo ganaax. Waxaase jiray in ay waxbarashada Giriiggu ku koobnayd ragga oo qura, inkasta oo ay jireen dumar la baro farsamada guryaha.

**Dhinaca Falsafada:** Sideedaba Cilmiga Falsafadu waa mid Giriiggu aqoon gaar ah u lahaa,la kiin waqtigaas ayey aad u shaac baxday, sababtoo ahayd, raggii cilmigaa qorayay waqtigaa waxay ahaayeen nimankii falsafada aabbaha u noqday.

**Xagga Cayaaraha:** Waxa Giriigga laga dhaxlay waxa ugu weynaa cayaarihii ay dadku ka barteen. Giriiggu wuxuu lahaa cayaaro badan, waxayna isugu iman jireen meel fagaare ah. waxana ka mid ahaa cayaarahooda : orodka, legdinta, tuuryada iyo waxyaala kale oo badan. Waxa kale oo ay lahaayeen gola

yaal hiddo iyo dhaqan loogu tala galay, shakina ma laha in adduunku ka faa'iideystey waxyaabihii Giriiggu ka tegey. Nimankii Giriigga ahaa oo Falsafadda aabbaha u noqday waxa ka mid ahaa Suqraad, Balaato, iyo Aristootal. Xagga Culuunta kale sida xisaabta, sayniska, siyaasadda, suugaanta iyo dawada aad buu Giriiggu ugu horreeyey.

**LAYLIS:**

1. Sheeg meesha ay ka yimaadeen dadka Giriigga ahi.
2. Maxaa ka dhexeeyey dawladhii yaryaraa ee badnaa ee reer Giriig?
3. Ka faallood waqtiga horumarka Giriigga, adigoo shegaya waxyaalihii dadkaasi ku caan noqday?



CASHARKA TODDOBAAD

## ILBAXNIMADII HORE EE ROOMA

Sida dadka reer Yurub qirayaan dadka Talyaaniga ahi waxay markoodii hore ka yimaadeen dhinaca Assiya, laakiin taariikhdu markay ahayd 753 C.H. ayey dadkaasi soo degeen meel la oran jirey Laatiyuum oo ka tirsan dhulka Talyaaniga. Hase ahaatee muddo aan badnayn ka dib ayaa dad ku magac dheeraa Iruruushiyiin dhulkii qabsadeen. Iruruushiyiintu iyagaa Rooma u keenay Ilbaxnimadii hore ee Giriigga. Intii ay xukunka hayeen ayaa waxa la sameeyey barlamaan la soo doorto, una kala qaybsan mid la yiraahdo majliska odayaasha iyo kan kale oo ahaa majliska dadweynaha. Laakiin markay ahayd taariikhdu 510 C.H. ayaa dadka Talyaaniga ah oo dhami ay diideen habkii Boqortooyada madaxna uu markaas ka ahaa Boqor la oran jirey Takruwiin.

Waxa halkaasna lagu tuuray nidaamkii Boqortooyada ka dhashay waxaana lagu beddeley habka la magac baxay Jamhuuriyad.

Rooma waxay ku soconeysey nidaamkaas ilaa uu ka dashay habkii ahaa Imbaraadooriga, markay taariikhduna ahayd 28 C.H. Nidaamkaas dambe nimanka madaxda ka noqday waxa ka mid ahaa Juliyas Kaysar iyo Ogostoos.

## DAL BALLAARSIGII ROOMA

Rooma waxay bilawday duulaan si ay hesho dal kale. Taasina waxay dhalisay in Rooma qabsato waddamo jiraan la ahaa iyo kuwo ka fogaaba. Taariikhdu markay ahayd 265 C.H. Waxay Rooma qabsatay dalka Giriigga oo ahaa midkii Ilbaxnimadu kaga timid. Dalka Giriiggu wuxuu noqday gobol Rooma u taliso, laakiin dagaalka u weyn ee Rooma cid la gashay wuxuu dhex maray iyada iyo Kaartayj (dhulka Tuunis). Sababta dhalisay dagaalkaasi waxay ahayd in gasiiradda Sisiiliya kuna taal bartamaha badda Cad ay Kaartay deris la ahayd. Taariikhdu markay ahayd 264 C.H. ayey Rooma qabsatay Gasiiraddii, waxaana arrintaas ka carooday Kaartayj. Dagaal xoog leh oo arrintaa ka dhashay wuxuu soconayey muddo ah 15 sano, waxaana meeshaas ku caan noq-

day geesigii Kaartayj oo la oran jirey Hanibaal. Ninkaasi dhawr jeer ayuu Rooma halis gashey, inta badanna isaga ayaa guushu raaceysey, hase ahaatee ugu dambeeystii Rooma ayaa adkaatay, waxay burburisey Kaartayj dadkeediina waxay ka dhigtay addoomo. Rooma waxa kale oo ay gacanta ku dhigtay Suuriya 64 C.H. Masarna waxay qabsatay 30 C.H. halkaana waxay ka asaastay Imbaraadooriyadii weyneyd.

## WAXYAALIHII ROOMA KA TAGTAY

Waxaynu soo aragnay in Rooma ay qabsatay waddammo hore u lahaan jirey Ilbaxnimo sida Giriigga iyo Masaarida waxayna Rooma lahayd waxyaalo badan, xagga dagaalka, hubka iyo xeeladaha dagaalka oo ay aad ugu horreysey. Dhinaca maamulka dawladda iyo dejinta xeerarka iyadaa caalamka kale ka qaatay. Intaas waxa dheer Roomi iyadaa hab barlamaan sameysay, kaas oo u kala baxayye mid sare iyo mid hoose. Xagga dhismaha waxay ka qaadatay Giriiga in kasta oo ay lahayd kuwo u gaar ah. Xagga diinta dadka Rooma waxay caabudi jireen sanamo iyo Boqoroba, laakiin markay diinta masiixiga ahi dhalatay ayey dadkaasi raaceen diintaas dambe.

**L A Y L I S :**

1. Xaggee bay dadka Talyaaniga ahi markooda hore ka yimaadeen, halkee bayse dhulka Talyaaniga ka degeen?
2. Maxaa la oran jirey dadkii Ilbaxnimada Rooma u kenay?
3. Ka sheekee dagaalkii dhex maray Rooma iyo Kaartayj, adigoo xusaya sababta dagaalkaas dhalisay?
4. Waxyaala badan ayaa Ilbaxnimada Rooma ka mid ahaa, wax ka sheeg waxyaalahaas?
5. Roomi xaggee bay adduunka kaga taal, dadkee bayse maagaalo madax u tahay?





# ILBAXNIMADII HORE EE HINDIYA

Hindiya waa dhul ka mid ah qaaradda Aasiya. Hase ahaatee waxaad mooddaa in ay ka baxsan tahay Aasiya, sababtuna waxa weeye, dhulka Hindiya waxa uu leeyahay xuduud dabiic ah oo ka goynaya Aasiya inteeda kale. Hindiya dhinaca waqooyi waxay ku leedahay buuraha adduunka ugu dheer oo la yiraahdo Himalaaya, koonfur Galbeedna Badda Carabta, koonfur Barina Badweynta Hindiya. Xuduudkaas dabiiciga ahi waxa uu waddanka ka badbaadin jirey cadow ka soo weerara debedda.

## SIDAY ILBAXNIMADA HINDIYA KU DHISANTAY

Waxaad soo aragteen in Ilbaxnimadii hore ay ka abuurantay hareeraha webiyada. Sidaa oo kale ayey Ilbaxnimadii Hindiya ka bilaabantay hareeraha webiga Hinduus, ka dibna ay ku fiday dhulka intiisa kale Sababtu waxay ahayd dhulka webigaasi maraa waxa uu u badnaa mid la degi karayey.

Dhinaca boqortooyada: Dadka reer Hindiya waxay soo arkeen xukun shisheeyey oo kala duwan. Markay taariikhdu ahayd 600 C.H. waxa Hindiya qabsaday boqorkii la oran jirey Daariyuus ee Beershiya. Boqorkaa iyo kuwo kale oo ka dambeeyey ayaa muddo Hindiya xukumayey. Hase ahaatee markay taariikhdu ahayd 326C.H. Hindiya waxa qabsaday ninkii reer Giriig ee la oran jirey Aliskandar. Hindiya waxay ka mid noqotay Imbaraadoodiyadii Boqorkaas, ilaa iyo intii ay ka dhalatay boqortooyadii Hindiya ee la oran jirey Mawrta madaxna uu u ahaa Boqorkii Jandaragubta iyo inankiisi Asooka oo isagu dhaxalay xukunkii.

## WAXYAALIHII HINDIYA LAHAYD

1. Dadka Hindida ahi waxay haysteen diino iyo Ilaahyo fara badan uu ka mid ahaa Barahma.
2. Hindidu aad bay ugu horeeyeen xagga suugaanta, ha noqoto gabay, geerar, heeso iyo sheekooyinkaba, adduunkuna iyaga ayuu kaga dayday qorista sheekooyinka.

3. Xisaabta: Sida caalamku qiray, Hindidu iyagaa keeney xisaabta oo aan lahayn ebirka, waayo ebirka waxa iska lahaa Carabta iyagaana xisaabta caalamka u gudbiyey.

4. Qoraalka Farta: Hindidu waxay lahaayeen far ka kooban 50 xaraf, waana ay ka fududayd tii Masaarida, xagga barashada iyo akhriskaba.

**LAYLIS:**

1. Waxay Hindiya lahayd xuduud dabiici ah, sheeg wixii aad xuduudaa ka garanaysid?
2. Xaggee bay ka dhalatay Ilbaxnimadii hore ee Hindiya?
3. Goorma ayuu Aliskandar Qabsaday waddanka Hindiya?
4. Maxaa ka mid ahaa waxyaalihii Hindiya laga bartay?
5. Sheeg magaca buuraha dhaadheer ee ku yaal woqooyiga Hindiya?





## ILBAXNIMADII HORE EE SHIINAHA

Sida la ogsoon yahay Dhulka Shiinuhu waxa uu ku yaal Aasiyada koonfur bari waana waddan aad u ballaaran. Waqtiga haatana waxa Shiinahu xuduud la leeyahay waddanka Hindiya, Midowga Soofiyeetiga iyo waddamma kale oo ka tirsan qaaradda Aasiya. Sida Ilbaxnimadii hore ee Masaarida iyo Mesobotaamiya ay uga dhalatay agagaarka webiyaasha Niil Dajla iyo Furaat ayey Ilbaxnimada Shiinuhu uga abuurantay hareeraha webiyaasha Huwaang-Ho, Sikiyaag iyo Yaangiste ka dibna waxay Ilbaxnimadii ku faaftay dhulka intiise kale. Waddanka Shiinuhu waxa uu aamin ka ahaa cadow debedda kaga yimaada, sababtuna waxay ahayd isaga oo leh soohdimo adag ha ahaadeen kuwo dabiici ah bad iyo beeriba amase kuwo ay dhiseenba sida derbiga weyn ee ku yaal dhinaca woqooyi galbeed ee Shiinaha. Sababta loo dhisay derbigaas waxa ay ahayd in uu ka celiyo duullaan laga yaabo in ay ku soo qaadaan dad reer guuraa ahaa oo degganaa galbeedka Shiinaha.

Haddii aynu taariikhda dib u raacno, waxa aynu ogaan karnaa in markii u horreeysey oo ay Ilbaxnimada Shiinuhu bilaabantay aanay jirin boqortooyo quri. Waxa jirtey in waddanka Shiinuhu u qaybsanaa boqortooyin yaryar oo mid kasta laga xukumo magaalo madax gooni ah. Laakiin markay taariikhdu ahayd 221 C.H. ayaa nin boqor ah oo la oran jirey Shan-Huwaang-Tii uu qabsaday boqortooyinkii yaryaraa oo dhan, waxaana uu halkaa ka asaasay boqortooyo qura oo isagu xukumo. Nimankii ka dambeeyeyna waxay wax ku xukumi jireen jidkii ninkaasi maray. Intii uu xukunka haystey boqorkii Shan Huwaag-tii ayaa waxa la dhisay derbiga weyn ee Shiinaha. Ilbaxnimadii Shiinuhu waxay gaartay heer sare sababta oo ah in boqortooya kasta oo qabata xukunka waddanka ku dedaali jirtey inay dhismaha Ilbaxnimada waddankaasi ay meel sare gaarto.

## WAXYAALIHI SHIINUHU LAHAAYEEN

Sidii aynu hore us oo sheegnay, Shiinuhu waxa uu ka mid ahaa dadkii Ilbaxnimo weyn ka sameeyey dhulkooda, isla markaana caalamka u faa'iideeyey wax weyn. Shiinuhu waxay la-

haayeen far ay qoreen oo ku dhisnayd nidaamkii Hirogliifiiyada. Markii Boqortooyinka Shiinaha la isku daray ayaa fartiina la isku darsaday. Xagga dhismaha shiinuhu aad bay ugu horreeyeen waxana u daliil ah waxyaalaha ay dhiseen oo uu ka mid yahay Gidaarka weyn oo ilaa maanta loo daawasho tago. Waxay kale uu caalamka kaga horreeyeey soo saaridda waraaqaha wax lagu qoro, iyagaana adduunka u gudbiyey.

Waxa kale oo Shiinuhu sameeyey alaab fara badan sida suxuunta cuntada, lacag iyo waxyaabo guryaha lagu qurxiyo. Dhinaca cayaaraha waxay ka mid ahaayeen dadkii qayb weyn ka qaatay waxayna soo saareen Cayaarta loo yaqaan kubbadda Miiska «Bing Bong».

**LAYLIS:**

1. Xaggee bay Ilbaxnimadii hore ee Shiinuhu ka dhalatay?
2. Sheeg sidii Boqortooyada Shiinuhu Ku samaysantay.
3. Maxay dadka reer Shiine u dhiseen Derbigooda weyn?
4. Ma ka mid bay ahaayeen Shiinuhu dadkii afkooda qoray?
5. Wax ka sheeg waxyaalihii Shiinuhu sameeyeen. Maxayse caalamkii ka dambeeyey u faa'iideeyeen?





## DHAQANKII CARABTU LAHAYD ISLAAMKA HORTII

Dhaqankaasi wuxuu ku dhisnaa sida badan, xumaan iyo tartan fara badan. Dhinaca nolosha caadiga ah markaan fiirinno dadkii reer baadiyaha ahaa ee dhinaca waqooyi degi jirey ayaana u badnaa dhaqankaas qallafsan oo ay ka mid ahaayeen, khamrada, dilka, dhaca, iyo wixii kale oo la mid ahaa. Waxaa kale oo lays weydaarsan jiray aflagaadooyin fara badan, gaar ahaan raggii gabyi jiray oo tusaale fiican u noqon kara noloshii Carabta ee berigaas joogtay.

Arrintaasi waxay dhaxal siisay in ay dhaawac weyn u geysatay qaranimadii iyo midnimadii Carbeed. Isla markaa nidaamkaas qabaliga ahaa ee waagaas maamulka gacanta ku hayey heer aad u sarreeya ayuu gaaray. Sidaas daraadeed kolna ma ayna yeelanin talis guud oo meel kaliya ka fula gasiiradda Carabta oo dhanna xukunkiisu sameeyo, dadka maamulkiisana gacanta ku qabta. waxa uu is hor taagey dhaqankaasi Ilbaxnimadii iyo horumarkii ay sameyn lahaayeen, haddii aan u fiirinno dawladihii ay deriska la ahaayeen ay ka mid ahaayeen, Beershiya, Ciraaq iyo Rooma oo Ilbaxnimada dhaqanka iyo dhaqaalahaba heer sare ka gaaray xukunkooduna ahaan jirey mid meel keliya ka fula.

**LAYLIS:**

1. Maxaa ka mid ahaa waxyaalihii Carabtu caadada u lahaan jirtey, dhinecee buuse u badnaa?
2. Gasiiradda Carabtu maxay la yeelan weyday talis meel keliya xukunkiisu ka fulo?
3. Sheeg waxyaalahay ku kala duwanaayeen Carabta iyo dawladihii deriska la ahaa?

## WAXYAALIHII CARABTU CAABUDI JIRTEY ISLAAMKA HORTII

Gasiiradda Carbeed waxaa aad ugu faafsanaa Islaamka hortii diintii la oran jirey. Wasaniyada dadka badankiisuna iyada ayuu haysan jiray, waxa uu dadkaasi u qaybsanaa laba qaybood:

Qaybta hore waxay rumaysnaayeen, Asnaam, taas oo ay ka samaysan jireen qoryo amase dhagxan. Isla markaa waxay rumaysnaayeen in ay Illaahay u dhaweynayso oo ay agtiisa naxariis ka siinayso Asnaamtaasi. Meesha xarunta u ihi waxay ahayd Maka, gaar ahaan Xaramka dhexdiisa iyo hareerihiisaba. Sida badanna qola waliba waxay lahaan jirtey Asnaam iyada u gaar ah oo ay keligeed caabuddo sida: Hubal, Laata, Cusaa, iyo Manaatao o dhammaantood qabaa'il Carab ahi kala caabudi jireen. Qaybta labaadna waxay rumaysnaayeen qorraxda, dadka, iyo wixii kale ee la midka ahaa oo ay rumaysnaayeen noloshooda waxtar inay u lahaayeen.

Waxaa intaa weheliyey laba diinood oo kale.

Tan hore waxay ahayd diintii Yuhuudda oo dhulka Carabta soo gaartay Islaamka hortii, waxayna ku faaftay Yaman iyo meela kale oo dhinaca woqooyi ah sida Yasrib, (Madiina), iyo Kheybar oo ku yaal gobolka Xijaas.

Tan labaad waxay ahayd diinta Masiixiga oo iyana ku faaftay Yaman, Xiira iyo Qasaan, dhinaca woqooyi oo derisna la ahaa dawladihii Beershiya iyo Room. Labadaa diinood ee dambe dhulka Carabta aad uguma faafin, sababtuna waxay ahayd, dadka badankiisa oo haystey diintii «Wasaniyada».

**LAYLIS:**

1) Sheeg diintii dadka badankiisu haystey Islaamka hortii.
2) Wax ka sheeg Asnaamtii Carabtu caabudi jirtey Islaamka hortii?
3) Maxaa ka mid ahaa diinihii kale ee dadku haystey, maxayse u faafi waayeen?
4) Qorraxda, dabka iyo wixii la mid ahaa maxay Carabta qaarkood u caabudi jireen?





## DHALASHADII NEBIGA

Nibigu waxa uu ku dhashay Maka qarnigii lixaad ee miilaadiga aakhirkiisii. Aabbihii iyo Hooyadiiba waxay ahaayeen Quraysh, dad sabool ah bayna ahaan jireen oo aan adduunyo badan haysanin. Nebiga aabbihii waxa uu dhintay isaga oo dhowr bilood uurka lagu siday markii uu dhashayna siday caadadda carabtu ahaan jirey waxaa la geeyey baadiyaha-si uu noloshaa miyiga uga soo fa'iidaysto. Markii uu Nebigu lix bilood jiray ayaa hooyadii dhimatay, waxaana nuujisay haweenay la oran jiray Xalima Sacdiya.

Markaasna awoowgii Cabdul Muddalib ayaa qaatay oo dhaqaalayn jirey. Laba sano ka dib ayuu dhintay awoowgii. Dabeetana waxa gacanta qabtay Abuu-Daalib nin la oran jirey oo adeer u ahaa, ahaana nin sabool ah oo carruur badan leh. Nebigu markii uu weynaaday waxa uu ka shaqaysan jirey ganacsiga, gaar ahaanna mid dhex maray isaga iyo Khadiija Binti Khuweylad.

Khadiija waxay ahayd haweenay garoob ah lacag fiicanna haysata, Nebiguna waxa uu guursaday iyada oo afartan jir ah, waxayna u dhashay toddoba caruur ah aad bayna u garab qabatay Nebiga kolkii uu diinta u halgamayey. Intaa waxaa inoo raacda in Nebigu markii uu yaraa iyo weynidiisiiba aanu weligii been sheegin. Carabtuna taas bay ku wada tiqiinay waxaana lagu magacaabi jirey Maxamed Amiin. Carabtu markii ay dhistay aqalka xurmada leh wuu ka qayb galay. Dhagaxa madoobi meesha uu iminka yaallo, qoladii dhigi lahayd markii lagu heshiin waayey oo lays aammini waayey ayuu Nebigu u sameeyey nidaamkay ku geeyeen meesha uu iminka yaallo.

Sidaas darteed dadka oo dhammi Nebiga way ku kalsoonaayeen, waxaana lagu yiqiinnay run sheeg iyo aamminnimo.

**LAYLIS:**

1. Sheeg qarnigii iyo magaaladii uu ku dhashay Nebigu, maxaase miyiga loo geeyey waagii uu yaraa?
2. Sheeg dadkii dhaqaalayn jirey Nebiga markii uu yaraa, magacow haweeneydii naaska ku duday?
3. Markii ay Carabtu ku doodday dhagaxa madow ayuu ahaa qofkii u garnaqay? Maxay ku magacaabi jireen Nebiga Carabtu?

## DIRITAANKII NEBIGA

Sida aan hore u soo sheegnay Carabtu waxay lahayd Islaamka hortii dhaqan qallafsan oo ay ka mid ahaayeen dilka, dhaca, Khamrada iyo khamaarka. Nebigu markii uu dhaqankaas qallafsan ku ogaaday ayuu iskaga fogaaday meelahay isugu tegi jireen kuna sameyn jireen waxyaalahaas xun oo dhan. Tusaale ahaanna waxaanu haynaa inaanu Nebigu weligii Ilaahay mooyee wax kale caabudin kana qayb galin xumaantaas. Nebigu keligiis ayuu tegi jirey godkii lagu magacaabi jirey «Xiraa» oo ku yiillay buur Maka u dhow dusheeda. isaga oo godkiisii ku jira maalin ayuu malag Jibriil u yimid waxa uuna ku yiri «Akhri», Nebiguna waxa uu u celiyey 'anigu wax ma akhriyo'. Inta ay ereyadaas dhawr jeer is weydaarsadeen ka dib ayaa Jibriil ku yiri, «Waxaad akhridaa magaca Ilaahaaga», Aayaddaasuna waxay ahayd tii Ilaahay ugu soo hor dejiyey Quraanka.

Nebiga da'diisu waxay ahayd markaas iyada ah afartan sano (40). Muddo aan la aqoonin intay ahayd maalintaa markii ay ka dambeeysay ayaa Ilaahay Nebiga ku amray in uu dadka Ilaahay amarkiisa gaarsiiyo sharkana uga digo khayrkana faro. Isla markaas ergadiisu waxay ahayd mid aan ninna gaar u ahayn ee dadka oo dhan u dhaxaysa. Gasiiradda Carabtana waxa uu ku qaaday dagaal xoog leh si uu uga tiro dhaqankii xumaa ee halkaas yiillay.

**LAYLIS:**

1. Nebiga intaan la soo dirin xaggee buu tegi jirey, muxuuse u tegi jirey?
2. Halkee bay isku arkeen Nebiga iyo Jibriil maxayse ku wada hadleen?
3. Sheeg waqtigaye ergadii Nebgiu bilaabantay, yaase loo diray?
4. Maxaa Nebigu dagaalka ugu qaaday qabaa'ilkii Carbeed?





## FAAFITAANKII ISLAAMKA

Nebiga markii lagu amray diinta in uu kor ugu dhawaaqo dadkana wada gaarsiiyo waxa uu aad ugu dadaaley in uu ka dhaadhiciyo dadka oo dhan diinta micneheeda iyo ujeeddada laga leeyahay. Isla markaa waxa uu sheegay in dadku isku mid yahay oo qofna qof ka fiicnayn ee sida loo kala cibaado badan yahay oo keliya Ilaahay loogu kala dhow yahay oo loo kala wanaagsan yahay.

Afkaartaas cusub diintu markii ay ku dhawaaqday ayey gaaladii ka argagaxday waxayna damceen in ay is hortaagaan fiditaanka diinta. Isla markaas waxay xumaan iyo colaad badan u qaadeen Nebigii iyo dadkii raacsanaa. Xumaantaas oo qudha gaaladu Nebiga iyo Muslimiinta kuma dayn ee weliba waxa ay ugu dari jireen dil, cay iyo wixii la mid ahaa.

Nebigu markii uu dhibaatooyinkaas gaalada u adkaysan kari waayey ayna damceen in ay dilaan isaga, ayaa Ilaahay ku amray Nebiga in uu Maka ka qaxo waqti habeen ah. Madiina ayuu u kacay sannadkii 632 dhalashadii Ciise ka dib (C.D.) isaga uu la socdo Abii-Bakar Al-Sidiiq si uu uga nabad galo dhibaatadaas gaalada. Taariikhda Islaamku waxay ka bilaabantay Nebigu maalintii uu Madiina tegay, waxayna si joogta ah u bilaabantay waqtigii uu Cumar Binu Khadaab dawladdii Islaamka madaxda u ahaa.

**LAYLIS:**

1. Sheeg waxyaalaha diintu ku baaqday?
2. Gaaladu markiiba maxay ugu bilawday colaad Islaamka?
3. Taariikhda Islaamku waagee bay billaabantay, yaase bilaabay?
4. Maxaa Ilaahay Nebiga ugu amray in uu ka qaxo Maka?

## DAGAALADII NEBIGA IYO GAALADA

Nebigu markii uu tegay Madiina talis uu isagu madax u yahay ayuu sameeyey waxaana lagama maarmaan ku noqotay si uu islaamka tiir adag ugu qotomiyo, isaga iyo asxaabtiisu in ay Quraysh la jihaadaan waxayna iskaga hor yimadeen dagaallo fara badan.

Nebigu ujeeddaduu ka lahaa dagaaladaas waxay ahayd inuu diinta Islaamka dadka ku faafiyo, tusaale ahaana waxaynu u soo qaadanynaa labadii dagaal ee ugu horreyey.

Kan hore waxa uu ahaa dagaalkii Badar oo dhacay laba sano ka dib Hijradii Nebiga gaaladaana weerar ku soo qaadday Muslimiinta iyaga oo xujo ka dhiganaya in ay safarkoodii halis galiyeen.

Dagaalku waxa uu ka dhacay ceelka Badar ee Madiina u dhow goobtaasna waxaa lagu jabiyey gaaladii.

Goobtaasi wanaaga ay u lahayd Muslimiinta waxa uu ahaa Muslinka oo yaraa oo taag darraa. Haddii maalintaa la jebin lahaana Islaamku dhibaatooyin badan ayuu la kulmi lahaa, dhakhsana uma faafeen.

Kii labaadna waxa uu ahaa Uxud oo dhacay saddex sano ka dib Hijradii Nebiga. Buurta Uxud oo Madiina u dhow ayuuna ka dhacay gaaladaana soo weerartay Muslimiinta. Markii hore gaaladaa la jebiyey, markii dambana muslimiintaa laga guulaystay, sababtuna waxay ahayd iyagoo ku jeestay alaabtii ay ka furteen gaalada markii hore, amarkii Nebigana aan fulinin.

LAYLIS:

1. Weerarkii Badar halkee buu ka dhacay, sababtuu u dhacay maxay ahayd?
2. Sheeg qoladii lagu jabiyey dagaalkii Uxud, yaase soo duuley?
3. Nebigu maxaa uu gaalada ula jihaadayay?
4. Maxay ahayd sababtii Muslinkii loo jebiyey dagaalkii Uxud?





## FURITAANKII MAKA

Lix sano hijradiisii markii laga joogay ayaa Nebigu damcay in uu Kacbada soo siyaarto (Cumra), laakiin Quraysh baa is hor taagtay oo u diiday siyaaradaas Maka. Nebigu waxaa uu diray Cusmaan Binu Cafaan si uu ugu ergeeyo ujeeddada Nebigana ugu faahfaahiyo dabeetana gaaladii way xidhay Cusmaan.

Markaa ka dib Muslimiintu waxay isu diyaariyeen in ay Maka weeraraan. Qurayshi waxay ogaatay arrintaas, kolkaasaa laysugu yimid heshiiskii Xudaybiya ee labada qolo dhex maray oo ahaa in aan toban sano dagaal dhicin. Waxyaalihii lagu heshiiyeyna waxaa ka mid ahaa:


1. Inay Muslimiintu sannadkan dib u noqdaan, sannadka dambena soo laabtaan si ay u cumraystaan.
2. In Nebigu qofkii Quraysh ka soo Islaama ee aan dadkiisu ogeyn ay soo celiyaan Muslimiintu.
3. In Quraysh qofka u yimaada aanay waajib ku ahayn in ay Nebiga u celiso.

Laba sano markii ay ka soo wareegtay heshiiskaas ayey Qurayshi jabisay oo ay weerartay dadkii Nebiga la jirey, markaasay Muslimiintu ku soo duuleen Maka siddeed sano ka dib Hijradii. Ciidankaas uu Nebigu hogaaminayey waxa lagu qiyaasay toban ilaa laba iyo toban kun. Nebigu intii aanu Maka gelin waxa ka hor yimid Abuu Sufyaan nin la oran jirey oo ka mid ahaa madaxda gaalada. Qurayshi markii ay ogaatay xoogga Muslinka ayey cabsatay oo ayna isku dayin wax dagaal ahba kolkaasaa xoogii Islaamku Maka galay sannadkii siddeedaad ee Hijrada, iyaga oo si rasmi ah u furay Maka. Xaramka dhexdiisa iyo hareerihiisa waxay ka tirtireen Asnaamtii ka dhisnayd iyaga oo ku dhawaaqaya, «XAQII BAA YIMID», «XUMAANTIINA WAA TAGTAY».

Waxaa intaa inoo raaca heshiishkii Xudaybiya ka dib in uu Nebigu waraaqo u diray dawladihii Gasiiradda Carabta, meeshii aanu hore u gaarin Islaamku iyo dalalkii deriska la ahaa:

1. Boqorkii Roomaanka Hargal.
2. Boqorkii Beershiya Kisraa iyo kii Xiira (Ciraaq).
3. Xaakimkii Masar Maquuqis.

4. Boqorkii Xabashida Najaashi.



Afartaas nin Nebiga waxa ka rumeeyey boqorka Xabashida kaliya, saddexda kalena ma ayna rumaynin in kasta oo Maquuqis hadal fiican ku hadlay. Sababta uu Nebigu waraaqaha u dirayey waxay ahayd risaaladdiisa oo ahayd mid caam ah oo aan Carab kaliya gaar u ahayn. Nebigu inta uu si wacan u gutay ammaanadii Ilaahay u diray ayuu Madiina ku geeriyooday sannadkii tobnaad ee Hijrada oo la mid ah 631 ka dib dhalashadii Nebi Ciise.

**LAYLIS:**

1. Heshiiskii Xudaybiya sannadkee buu ahaa, maxaase lagu heshiiyey?
2. Sheeg sannadkii Maka la furtay gaaladuse maxay la dagaallami weyday?
3. Sheeg sababta uu Nebigu ugu soo duulay Maka, Muslimiintuse maxay qabteen markii ay Xaramka galeen?
4. Yey ahaayeen Nebigu dadkii uu waraaqaha u diray, wax rumeyeyse ma jireen?
5. Nebigu sannadkee buu geeriyooday, risaaladdiisuse maxay ahayd?



CASHARKA TODDOBA IYO TOBNAAD

## SOOMAALIYA IYO DIINTA ISLAAMKA

Islaamku markii uu ka dhashay Gasiiradda Carabta dhulka Soomaalida markiiba wuu soo gaaray, wuuna ku faafay isaga oo asaas u ahaa xiriirkii qotada dheeraa oo ay Soomaalidu la lahayd ummadda Carabta. Xiriirku waxa uu ku sinna taariikhdu markay ahayd 120 C.D., markii uu dumay ilxirkii ma'rab ay dad Carab ahi yimaadeen dalkan Soomaaliya. Ilaa iyo waagaasna labada dal xiriir bay lahaayeen. Islaamkuse waxa uu soo gaaray dalkan markii uu jacfar Binu-Daalib wax yar ku hakaday magaalada Seylac, ka dib intii uu Xabashida u soo Hijrooday. Waxa uu sameeyey meelo laga fafiya Islaamka isaga oo la kaashanaya Carabtii hore u timid waddanka. Taasu waxay ahayd Nebigu intii aanu Madiina u hijroonin.

Halkaas waxa aynu ka ogaan karnaa Islaamku in uu Soomaaliya adduunyada kale oo dhan horteed soo gaaray, Gasiiradda Carbeed marka laga reebo. Intaa waxaa weheliya ergooyin kale oo waddankan yimid Islaamka faafitaankiisana qayb ka qaatay. Tan hore waxay soo tallowday markii ay Hijradu ahayd 122 (740 C.D.) ka dib intii la dilay SAYD BINU CALI BINU XUSEEN, markaana uu xeebaha Soomaaliya Islaamka ku faafiyey. Tan labaadna waxay ahayd imaatinkii Shiiraasiyiinta oo ahaa niman Beershiya u dhashay. Waddanka waxay yimaadeen 975 C.D. faafitaankii Islaamkana way ka qayb galeen gaar ahaan labada Jubba. Waxyaalahay qabteen waxaa ka mid ahaa dhinaca Ilbaxnimada marka aan fiirino dhismaha masaajidka Cabdulcasiis. Isla markaas waxay qabsadeen jagooyinkii Saydiyiintu hore u haysteen.

Mar saddexaad Cabdul-Maalik Binu Marwaan oo dawladdii umawiyiinta madax u ahaa ayaa soo diray ergo taariikhdu markii ay ahayd 65-85 ka dib hijradii Nebiga. Waxaa hoggaamiye ka ahaa Muuse Binu Khashcam nin la oran jiray. Qaybta afraad ee Islaamka faafitaankiisa ka qayb gashay waxay ahayd culimadii Soomaaliya timid ee diinta sida fiican u yiqiin. Si wacan ayey diinta ugu fidiyeen dadka Soomaaliyeed oo maskaxdooda aad uga dhaadhiciyeen iyaga oo Af Soomaali ugu sheegaya ujeeddada diinta Islaamka. Culimadaas wa-

xaa u horgal ahaa (1) Sheekh Yuusuf Kawneyn oo ahaa ninkii Quraanka Af Soomaali ku higgaadiyay. Culimadaa waxa kale oo ku jiray Sheekh Isaaq iyo Sheekh Ismaaciil Jabarti. (2) Axmed Gurey oo ahaa ninkii diinta faafitaankeeda u halgamay qarnigii lix iyo tobnaad ee Miilaadiga.

**LAYLIS:**

1. Sheeg sababtii fududaysay Islaamka faafitaankiisa.
2. Kuma ayuu ahaa ninkii soo gaarsiiyey Islaamka Soomaaliya, suduuse ugu fidiyey dalka?
3. Ergadii Saydiyiintu waagee bay soo tallaabeen, mase dhex maray iyaga iyo Shiiraasiyiinta?
4. Sheeg ergadii Umawiyiintu taariikhdii ay soo tallaabeen iyo hoggaabiyahoodii. Ma iyagaa dhisay masaajidka Cabdulcasiis?
5. Ka sheekay culimadii Soomaalidu sida ay uga qayb gashay faafitaankii Islaamka.






## ISLAAKMA IYO DALKA SHISHEEYAHA SIDA UU GAARAY

Inkasta oo Nebigu waraaqo u diray dalalkii shisheeyaha ahaa boqoradoodii oo uu Islaamka ugu baaqayey, haddana diinta Islaamku dibedda ugama bixin gasiiradda Carabta Nebigu intii uu noolaa. Casharkan waxa uu ku saabsan yahay arrintaas, waxa aynu u qaybinaynaa laba:- 1. Tan hore: **Khalaafadii Abuubakar Sidiiq.** Abuu-Bakar markii la doortay gugii kow iyo tobnaad ee Hijrada (632) ka dib dhalashadii Nebi Ciise, waxa uu tixraacay siyaasadii Nebiga ee ahayd in lagu faafiyo Islaamka dalalka ajnabiga ah. Waxa uu diray xoog uu hoggaaminayey khaalid Binu Waliid oo ahaa nin geesi ah cabsidana aan aqoonin, faafintaankii Islaamkana qayb weyn ka qaatay. Ciidankaas waxa uu ku haggaajay gaashaanbuurtii ka koobnayd Xiira iyo Beershiya. Markiiba waxa ay qabsadeen Xiira oo ku tiilay Koonfurta galbeed ee Ciiraaq. Intaa ka dibna waxaa amar lagu siiyey xooggaas qaarkii oo Khaalid madax ka ahaa in uu ku biiro ciidankii Islaamka ee shaam u kacay, si uu garab u siiyo ciidankaas kale ee Islaamka. Shaam berigaas waxaa gumeysan jirtay Boqortooyadii Roomaanka, imikana waxay u qaybsan tahay saddex: Suuriya, Lubnaan, iyo Falastiin. Khaalid markii uu shaam tegay oo isagu madax ka noqday ciidamadii Islaamka oo dhan, waxay iskaga hor yimaadeen xooggii Roomaanka, goobtii Yarmuuk gugii saddex iyo tobnaad ee Hijrada 634 ka dib dhalashadii Ciise. Goobtaa waxaa lagu jabiyey Ciidamadii Roomaanka, dabadeedna Muslimiintu waxay qabsadeen Shaam badideeda. Qaybta labaad waxa weeyey **Khilaafadii Cumar Binu Khadaab:** Cumar markii uu madax noqday gugii saddex iyo tobnaad ee Hijriga ama 634kii ka dib dhalashakii Ciise, talaabo uu qaado waxaa ugu horreeysay Khaalid Binu Waaliid oo uu ka qaaday madaxtooyadii Ciidamada. Waxa uu u dhiibay jagadaas Abii Cubayda Ibnu Jarraax, oo madax u ahaa ciidamadaas intii Shaam la qabsaday. Sannadku markii uu ahaa 635 ka dib dhalashadii Nebi Ciise ayaa Cumar Binu Caas Falastiin ku duuley waxayna isku heleen xooggii Roomanka goobtii (Ajnaadeen). Halkaas guushii isaga ayey raacday, ka bacdina waxa uu qabsaday Beeytu-Muqdas iyo Falastiin inteedii hartay. Dhinaca Beershiya Cu-

mar Binu Khadaab waxa uu u diray mar labaad xoog uu hoggaaminayo Sacad Binu Abii Waqaas gugii shan iyo tobnaad ee Hijrada halkaas oo uu guul weyn ka soo hooyey ka dib markii uu xoogga Roomaanka ku jebiyay goobtii (Qaadisiya). Halkaasna waxaa ku dhintay hoggaamiyihii Roomaanka, Rustum. Sidaa ayuu Islaamku ku gaaray dalalkii shisheeyaha ahaa. Maanta waxa lagu qiyaasaa dadka Islaamka ah tiradiisa in ka badan 600 oo malyuun.




**L A Y L I S :**

1. Ka sheekay sida uu ugu faafay Islaamku dalalkii shisheeyaha.



2. Ciidamadii Islaamka ee markii hore u baxay dhinaca Beershiya Yaa hoggaamiynayey, Maxayse qabteen?
3. Sheeg qoladii lagu jebiyay goobtii Yarmuuk iyo Taariikhdu intay ahayd?
4. Sheeg ninkii Falastiin ku duuley iyo goobtay iskaga hor yimaadeen xooggii Roomaanka?
5. Goobtii Ajnaadeen qoladee lagu jebiyay yaase hoggaaminayey Ciidankii Islaamka?
6. Taariikhda 690 C.D. waxaad u beddeshaa Hijri?

## CASHARKA SAGAAL IYO TOBNAAD

## DIINIHII HORE EE AFRIKA

Dadku markii uu hareerihiisa eegay waxa uu ogaaday in waxyaalaha ku xeeran ay jiraan wax sameeyey. Dadku baraarohooda iyo dhibaatooyin kooda waxay foodsaarayn jireen wax iyaga ka weyn oo ka sarreeyey. In kasta oo dadku kala duwanaayeen oo qolo waliba waxaas si gooniya u haysatay, waxaynu oran karnaa waxaa dadka ka weyni waxa uu had iyo goor ahaa (ILAAH).

Dadka Afrika ku nool badankoodu intaan diinaha Kiristaanka iyo Islaamku iman, waxay lahayeen diino, ILAAHNA way yiqiineen.


ILAAH way yiqiineen in uu isagu dunida sameeyey, inaanu jir la taaban karo lahayn in uu isagu wax nooleeyo waxna dilo. Afrikaanku waxay kale oo rumaysnaayeen in dadku marka uu dhinto, naftoodu soo noqto.

Sidaa aawadeed, iyaga oo karaamo iyo denbi dhaaf weydiisanaya ILAAHAY iyo arweexda waxay samayn jireen Alla Bari iyo siyaarooyin ay qubuuraha siyaaran jireen. Alla Bariyadaasi waxay inna tusayaan in wax la caabudi jiray. Taa waxa kale oo inoo caddayn kara, iyada oo noloshii Afrika ee hore ay ku xirnayd diin iyo ILAAH. Magacyada dadka loo bixin jiray kuwa xoolaha iyo dhirtuba sidaas oo kale ayey xiriir ula lahaayeen diinta.

Inkasta oo ay Afrika diina jireen, haddana waxa kale oo jiray dad iyagu cawaana oo aan diin haysan. Sidaasi Afrika keliya kuwa koobnayn, maxaa yeelay aduunka kaleba wuu lahaa dad caynkaas ah. Hase yeeshee, markii diinta Kiristaanka iyo ta Islaamkuba Afrika soo galeen, dadkii afrikaanka ahaa way u dhega nuglaadeen. Taasi waxay haddana muujinaysaa in dadkaasi markoodii horeba diin lahaayeen. Diinta Islaamka haddii aynu fiirinno, waxaynu arkaynaa inay si fiican ugu faaftay Afrikada Bari, tan Woqooyi iyo dhanka Galbeedkaba.




1. Sidee buu dadku ku ogaaday in ILAAH jiro?
2. Maxay ahayd fikradda ay dadka Afrika ka haysteen ILAAH?
3. Waa maxay Alla Barigu, maxaase loo sameeyaa?
4. Dadka Cawaanta ahi waa dad aan diin lahayn, Dadkaasi Afrika mooyee addunka kale ma jireen?
5. Maxay u fududaatay inay diinta Islaamku ka hirgasho Afrika?



## AFRIKA IYO DIINTA ISLAAMKU SIDII AY UGU FIDAY

Afrika waa qaarad weyn oo lagu qadaro dadka deggan laba meelood marka loo qaybiyo meeli inay Islaam tahay, sidu Islaamku ku soo gaadhayna waxa aynu u qaybinaynaa saddex **Tan hore waxa weey dhinaca bariga. Bariga Afrika** waxa uu **u dhawyahay koonfurta bari** ee qaaradda Aasiya, ilaa muddo **horena** xiriir baa ka dhexayn jiray waxa uuna u badnaa xiriirkaasi ganacsi. Cilaaqaadkaas labada dal waxay aad u sii xoogaysteen Carabtu markii ay saldhigyo ka sameysatay xeebaha Afrikada bari, halkaasna **waxay** ka bilaabeen talisyo, kuwaas oo gacanta ku dhigay xeebahaas intooda badan.

Tusaale ahaanna waxa aynu u soo qaadan karraa Muqdisho, Baraawe, Mambaasa, Sinjibaar iyo Mussanbiig. Dadkaas Carabta ahi waxay awood u heleen inay xeebaha ka fogaadaan oo ay qaaradda hoos u galaan Islaamkana ku faafiyaan meelahaas ay gaareen. Isla markaas waxa garab iyo gargaar ku siiyey faafitaankaas dadkii iska dhalka ahaa afaf kala duwanna ku hadli jiray oo ay Carabiga iyo Sawaaxilguba ka mid ahaayeen. Waxaa kale oo iyana qayb ka qaatay faafitaankaas Islaamka ganacsatada, culimada, socotada oo dhammaantood garab isku siiyey arrintaas iyada ah. Sidaas ayuu Islaamku ugu faafay Afrikada Bari isaga oo aan dagaal iyo jihaad midna cuskan sidii meelaha kale qaarkood ka dhacday. Waxa uu cuskaday gundhigna u ahaa xiriirkii ka dhexeeyey bariga Afrika iyo Gasiiradda Carbeed.





**LAYLIS:**

1. Afrikada Bari sidee buu Islaamku ku soo gaaray, Muxuuse cuskaday?
2. Carabta yaa gacan ku siiyey faafitaankaas markii ay qaaradda hoos u galeen?
3. Sheeg saldhigyadii Carabta, yaa kale oo ka qayb galay fidintii diinta Islaamka ee qaaradda Afrika?

CASHARKA KAW IYO LABAATANAAD

## AFRIKADA WAQOOYI IYO ISLAAMKA

Qaybta labaad ee ayun Islaamka faafitaankiisa kaga hadlaynaa sidii aynu horeba u soo sheegnay waxaa weeye dhinaca woqooyi. Islaamku dhinacaas waxa uu soo gaaray berigii Cumar Binu Khadaab dawladdii Islaamka madaxda u ahaa ee labaatan sano laga joogay Hijradii Nebiga. Mudadaas ayey Carabtu ku soo duushay Masaarida, ciidamadii halkaas weerarka ku soo qaaday waxaa hogaamiye u ahaa Cumar Binu Caas nin la oran jiray oo qabsaday Masar, inta uu ciidamadii Roomaanka ee halkaas joogay ka adkaaday.

Dadkii halkaas degganaa waxay aqoonsadeen Diinta Islaamka, sababtuna waxay ahayd xukunkii Roomaanka oo ahaa mid aad u qallafsan, dhibaatooyin badanna dadka u geystay. Intaa ka bacdi Islaamku waxa uu ku faafay Afrikada kale gaar ahaan dhinaca waqooyi ilaa qaaradda Yurub laga gaaro dhinaceeda koonfur galbeed Isbayn.

Ciidamadii Islaamka ee dhinacaas woqooyi ku duulay waxaa madax u ahaa Cuqba Binu Naafic ninkii lagu magacaabi jiray konton sano ka dib Hijradii Nebiga, halkaas waxay iskaga hor yimaadeen dagaalana ku dhex mareen milaterigii Roomaka.

Dagaaladaas guushii waxay ku raacday ciidamadii islaamka oo qabsaday ilaa Tuunis Gobolka lagu magacaabo iminka. Waxayse Roomaankii awood u heleen inay Cuqba dilaan oo ay dhulkii hore looga qabsaday qaarkii mar labaad qabsadaan. Waxaa madax ka noqday ciidamadii Islaamka Cuqba ka dbi Xasan Binu Nucmaan nin la oran jiray oo isaguna dagaalka halkiisii ka sii waday. Guul weyn ayuu ka soo hooyey Roomaankii iyo dadkii barbariyiinta ahaa oo lagu yaqiinay dagaal yahannimo.

Xasan markii uu ka tegay madaxtinimadii ciidanka, waxaa uga dambeyey Muuse Binu Nuusayr oo ahaa ninkii si kama dambeys ah u qabsaday waqooyiga Afrika ilaa Isbayn. Aad iyo aad ayuu Islaamka ugu faafiyey dadkii halkaas degganaa



isaga oo hadba si gaar ah u cuskanaya mar dagaal iyo jihaad marna wanaag iyo dadka oo si fiican loogu sheego ujeeddada Islaamka maskaxdiisana laga dhaadhiciyo.

Intaa waxaa inoo raacda Islaamku sidii uu ku gaaray koonfurta Masar iyo Suudaan. Carabtu waxay damacday markii ay Masar qabsatay in ay waddankaas xoog ku galaan. Hase ahaatee arrintaasi way u suurtoobi weyday inay hore u dhaafaan magaalada ASWAAN.

Qarnigii siddeedaad ee Milaadiga Carabtu waxay la yeelatay waddankaas xiriir ganacsi ah, xiriirkaasuna wuxu saldhig u noqday faafitaankii uu islaamku ku faafay labada dal ee Masar iyo Suudaan, kaas oo waddanka u xaaray fiditaankii islaamku. Suudaan laba waddo ayuu u soo maray.

1) Badda Cas wuu kaga soo tallaabay,
2) Webiga weyn ee Masar iyo Suudaan isku xirana wuu soo raacay.

**LAYLIS:**

1. Sheeg waaguu soo gaaray Islaamku Waqooyiga Afrika iyo ninkii madaxda ka ahaa dawladda Islaamka?
2. Ciidamadii Islaamka ee Masar ku soo duulay ayaa madax u ahaa, Masaariduse maxay Islaamka u galeen?
3. Ka sheekee Cuqba Binu Naafic iyo ciidankii Roomaanka waxay isla mareen.
4. Sheeg dhibaatooyinkii ka hor yimid Xasan Binu Nucmaan Ninkii madaxtinimada uga dambeyey kuma aynu ahaa, muxuuse qabtay?

## AFRIKADA GALBEED IYO ISLAAMKA

Markii uu islaamku gaaray Afrikada Woqooyi, laba waddo ayuu u maray Afrikada Galbeed. Waddada hore waxay ahayd tii uu Islaamku u maray dhulka Soodaan. Islaamku Masar markii uu soo galay, waxa uu raacay Webiga Niil ilaa uu Soodaanta Woqooyi gaaray. Halkaa markii uu marayay waxa uu u bayray xagga Galbeed waxana Galbeedka geeyay rag Carbeed oo ganacsata ah.

Waddada labaad waxay ahayd mid Woqooyiga Afrika ka iman jirtay oo raaci jirtay dariiqii ganacsiga ee loomari jiray Galbeedka Afrika. Waxa la ogyahay in Carabta ganacsigoodu gaari jiray Badweynta Atlaantiga xeebeheeda bari oo ay muddo door ah xiriir ganacsi la lahaayeen Afrikada Galbeed.

Islaamku Waqooyiga Afrika waxa uu ku gaaray si nabadgelyo ah. Markii dadkii Afrikada Galbeed qaar qaateen diinta Islaamka way sii fidiyeen oo qola waliba qoladdii ka sii shishaysay ayay u sii dhiibtay. Sidaas ayuu Islaamku ugu fiday Galbeedka Afrika ila sidii uu u sii fidayay ku gaaray xuduudka Kongo.

**LAYLIS:**

1. Markii uu Islaamku Masar soo galay, sidee buu ku gaaray dalka Soodaan?
2. Maxay kala ahaayeen labada waddo ee Islaamku uu sii maray Galbeedka Afrika?
3. Maxaa loo yiri Islaamku si nabadgelyo ah buu ku gaaray Afrikada Galbeed?
4. Islaamka hortii, Maxay Carabtu ka dooni jireen Afrikada Galbeed?
5. Sidee bay dadka Afrikada Galbeed qayb uga qaateen fidintii Islaamka?





## TAARIIKHDII AXMED GUREY

Axmed Ibraahim oo ku magac dheer «Gurey» waxa uu ku dhashay qarnigii shan iyo tobnaad tuulo yar oo la oran jirey Hoobato, kuna taal dhinaca woqooyi ee magaalada Harar (Adari). Harar waxay ku taalaa galbeedka wadanka Soomaaliyeed ee iminka Axmaaradu gumeysato.

Axmed Gurey waxa uu ku barbaaray Harar oo uu Quraanka ku bartay. Labaatan sano markii uu jiray waxa uu u kacay Seylac oo ahayd berigaas Xarunta Soomaalida. Halkaas waxa uu ku soo booqday reer abtigii oo degganaa magaala madaxdaas Seylac. Isla markaas Axmed waxa uu korodhsaday Culuunta diiniga ah, waxaa kale uu iyana bartay fardaha sida loo fuulo looguna dagaalamo. Taariikhda Milaadigu markay ahayd 1527, ayey Soomaalidu xaruntoodii ka dhigeen Harar, markii uu Boortuqiisku gubay Seylac.

Dabeetana Axmed waxa uu madax u noqday ciidamadii Soomaalida ee Xabashida gaashaanka u hayey waxa uuna ahaa nin geesi aha oo Wadaninimaduna ku fog tahay, diinta Islaamkana aad iyo aad u jecel, xaqa iyo cadaaladana is garab taaga oo aan agtiisa qofna lagu dulmiyin. Ciidamadii Soomaalida ee qabsatay dhulka Xabashida badankiisa qarnigii lix iyo tobnaad ee milaadiga isaga ayaa madax ka ahaa, ugu dambeystiina waxa uu ku dhintay gacanta Boortuqiiska ee Xabashidu u qayshatay.

Axmed Gurey dabadii waxaa madaxtinimadii la wareegay sanadkii 1543 C.D. Amiir Nuur Maxamed oo uu abti u ahaa. Amiir Nuur waxa uu ahaa nin lagu tilmaamo geesinimo, wadaninimo iyo codkarnimoba. Xooggii Soomaalida ee Xabashida la dagaalamayey Axmed dabadii, isaga ayaa madax ka ahaa, waxana uu dilay boqorkii Xabashida ee lagu Magacaabi jiray Jalaaddyoos oo ahaa ninkii Boortuqiiska u qayshaday dilkii Axmed Gureyna isaga ayaa masuul ka ahaa. Boqorkaasi waxa uu caan ku ahaa dilka, nacaybka iyo dhibka Soomaalida intaba. Amiirku dhulka Xabashida ee ay Soomaalidu qabsatay waxa uu u talin jiray shan iyo labaatan sano.

**LAYLIS:**

1. Sheeg Axmed Gurey qarnigii uu dhashay iyo halkii uu ku dhashay, yaase iminka haysta meeshaa iyada ah?

2. Sheeg waqtigii Axmed Gurey la dilay, yaase mas'uul ka ahaa dilkaas?

3. Muxuu qabtay Amiir Nuur markii uu madaxtinimada la wareetay?





## DAGAALLADII AXMED GUREY IYO GAASHAANBUURTII GAALADA

Axmed Gurey markii uu dhashay qarnigii shan iyo tobnaad ee Milaadiga aakhirkiisii Soomaalidii Muslinka ahayd iyo Xabashidii diinta Masiixiga haysatay ee deriska ahaa waxa dhex mari jiray dhibaatooyin badan oo dilka iyo boobku ay u badnaayeen. Coladaas iyada ah waxaa keenay:

1. Labada dal oo aan isku diin ahayn.
2. Isticmaarka oo aad isugu diri jiray intii uu Afrika soo galay si uu danihiisa u gaarka ah u gaaro.

Axmed Gurey markii uu ku barbaaray halgankaa labada waddan ka dhexeeyey ee uu ciidankii Soomaalida madax u noqday waxa lagama marmaan noqotay in uu Xabashida la jihaado. Waxa uu bilaabay dagaaladaas iyaga ah 1528 C.D., Isaga oo hoggaaminaya xoog lagu qiyaasay 12,000.

Dagaaladii ugu horeeyey ee isaga iyo Xabashida dhex maray waxay ka dheceen tuula lagu magacaabi jiray «Baadqi» oo u dhexeysay toga Hawaas iyo Gobolka Shawa oo ay iminka ku taalo Xarunta Xabashiida Ardasababa. Halkaas guushii waxay ku raacday Soomaalidii. Isla markaas waxay Xabashidu u baqatay dhinaca xaruntoodii hore beytu Amxara halkaasoo markii labaad lagu jebiyey. Axmed Gurey waxa uu diley Boqorkii Xabashida ee lagu magacaabi jiray (Libna Danqal).

Somaalidu ma damin weeraradaas oo dhulkii Xabashida ayey hore u galeen ilaa ay ka gaareen xududka Soodaanta. Taariikhdu markii ay ahayd 1540 C.D. ayaa Boqorkii Xabashidu «Jalaadyoos» uu u qayshaday Boortuqiiska si uu gacan u siiyo ugana gargaaro dhulkaas Soomaalidu ka qabsatay. Dawladdii Boortuqiisku way aqbashay in ay Xabashida u gargaarto, waxayna u soo dirtay Ciidan tiradiisu dhantahay 450 Askari oo wata hub cusub aadna uga fiican kii Soomaalidu haysatay. Dabeetana waxay wada jir u soo weerareen xagga badda iyo

xagga berrigaba Ciidamadii Soomaaliyeed taariikhdu markay ahayd 1543 C.D. Dagaaladaasna waxaa ku dhintay geesigii Soomaalida Axmed Ibraahim, waxaana dilay Ciidamadii Boortuqiiska ee Xabashida u soo hiiliyey. sidaa ayay ku dhammaatay noloshii halyeygii Soomaaliyeed isaga oo ujeeddadiisu ahayd Xornimada Waddanka iyo diinta fiditaankeeda.

**LAYLIS:**

1. Sheeg waxyaalihii keenay dagaaladii ka dhexeeyey labada Waddan.

2. Halkee buu ka bilaabay Axmed Gurey dagaalkii ugu horreyey, qoladee baase la jabiyey?

3. Kuma ayuu ahaa boqorkii Xabashida ee u qayshaday Boortuqiiska maxayse Boortuqiisku u qabteen?

4. Sheeg ujeeddooyinkii uu Axmed Gurey u halgami jiray, kuma ayuuse ahaa Boqorkii Xabashida uu dilay?